



OTTAWA-CARLETON
DISTRICT SCHOOL BOARD



BARITAANKA SHAQO

Baritaanka shaqadu waxa u siiyaa ardayda dugsiga sare awoodda ah inay kasbadaan darajoojin dheeraad ah iyaga oo markaasi la shaqaynaya bulshada ka baxsan dugsigooda ama iyagoo la samaynaya xidhiidh bulshada iyadu qayb ka ah dugsigooda.

Ardaydu waxa ay u helayaan fursad inay bartaan xirfado shakhsiyadeed iyo kuwo shaqoba taasoo muhiim u ah qorshaynta mustaqbal kooda shaqo iyo nololeedba.

WAAYO ARAGNIMADA SHAQO EE ARDAYGU SI TOOS AH UGA HAWL GALAYO MEEL SHAQO

- 1-4 darajo
- Ardaygu waxa uu tagayaa kana shaqaynaya xarun shaqo si uu u tijaabiyo xirfadaa shaqo
- Ardaygu waxa uu wax ka baranayaa meelaha uu ku fiican yahay iyo waxyaalaha uu xiiseeyo
- Ardaygu waxa uu samaynsanayaa xidhiidho taasoo waddo u ah xirfad shaqo
- Ardayga waxa la siinayaa qalabka uu naftiisa ku ilaalinaayo iyo tababar dhanka amniga shaqo ah
- Ardaydu waxa ay shaqaynayaan 2-6 saacadood maalintii

WAAYO ARAGNIMADA SHAQO EE KHADKA INTERNETKA

- 1-4 darajo
- Ardaygu waxa uu la hawl galayaa ganacsiyo iyo shirkado isagoo isticmaalaaya fiidiyow, iimayl iyo taleefan
- Ardaygu waxa uu dhammaystirayaa hawlahay ay tahay inuu qabto wakhtiga shaqada taasoo uu ka dhammayn karayo khadka internetka
- Ardaygu waxa uu wax ka baranayaa meelaha uu ku fiican yahay iyo waxyaalaha uu xiiseeyo
- Ardaygu waxa uu samaynsanayaa xidhiidho taasoo waddo u ah xirfad shaqo
- Tusaalayaasha waxa ka mid ah: cilmi baadhista suuqa, gelinta xogta, samaynta websaytyada, nashaqadaynta sawirro (graphics), taageerka maamulka shaqo, qoritaanka maqaal, samanynta macluumaad lagu wadaago baraha bulshada, u adeegga macmiilka, iwm.
- Ardaydu waxa ay shaqaynayaan 2-6 saacadood maalintii

ABUURITAANKA FURSADO SHAQO IYADOO LA ISTICMAALAYO NIDAAMKA BARITAANKA SHAQO

- 2 darajo
- Ardayga doonitaankiisa ayaa ah tuu ku dooranayo waxa uu doonaayo inuu barto
- Ardaygu waxa uu wax ka baranayaa meelaha uu ku fiican yahay iyo waxyaalaha uu xiiseeyo
- Ardaygu waxa uu samaynsanayaa xidhiidho dhowr ah kuwaasoo waddo u ah xirfad shaqo
- Adaygu waxa uu xidhiidh la samaynaya hogaamiyayaasha warshado iyo la taliyeyaal
- Ardaygu waxa uu bartaa xirfadaha hoggaaminta
- Ardaygu waxa uu helaa tababar iyo shahaadooyin ay aqoonsan yihiiin warshadaha shaqo